

# Baarista Malawadka iyo Mindhicirka weyn

Rekto- sigmoideoskopi



OGOW:

Si fiican u akhri warbixinta qoraalkaan waayo  
diyaargaroobid aan dhammaystirnayni waxay keeni kartaa  
inaan baarista caafimaad la fulin.



Lovisenberg Diakonale Sykehus

Lovisenberg Diakonale Sykehus  
Medisinsk poliklinikk  
Lovisenberggt. 17  
Telefon: 2322 5720

01-2020 somali



Lovisenberg Diakonale Sykehus

## **Waa maxay rekto-/sigmoideoskopi?**

Rekto-/sigmoideoskopi waa baaris caafimaad oo qusaya malawadka iyo qaybta hoose ee mindhicirka weyn. Tuubbo leedsamaysa ayaa lasoo geliyaa malawadka. Waxaa lagu arki karaa haddii isbeddel ka jiro meeshaas, waxaana la goyn karaa wixii burooyin ama buur-buur ah ee ku jira xuubka gudhiisa.

## **U diyaargaroobidda baarista**

Waa inaad sharaab badan cabtid maalinta ka horraysa baarista iskana ilaalsid cunista rootiga ka samaysan badarka dhammaystiran, miraha kataanka iyo iniinyaha ad-adag ee fawaakiha iyo miraha tuutka z shanta beri ee ka horraysa baarista.

Waxaa lagu siinayaa walaxda nadiifisa mindhicirka iyo malawadka markaad timaaddid laabka (Gastrolab-ka) si qaybta hoose ee mindhicirku u marato ayna u suuragasho in loo arko xuubabka mindhicirka sida ugu wanaagsan ee suurowda.

## **Dawooyin iyo jirrooyin kale**

Waa inaad na siisaa wixii warbixina oo ku saabsan dawooyin aadan u adkaysan karin, iyo jirrooyinka sida xanuunka wadnaha in dhiiggu ka hakado (angina pectoris), cillad wadnaha ah, dhibaatootin dhiig-bax, maadaama ay taasi saamayn ku yeelan karto doorashada hawl-qabadka.

## **Xeerarkaan ayaa quseeya dawooyinka saameeya muddada dhiig-baxa:**

- Haddii aad isticmaashid **Albyl-E**, waad sii wadi kartaa inaad qaadatid ilaa maalinta baarista haddii aan laguu sheegin farriin taas ka duwan.
- Haddii aad isticmaashid **Plavix/Brilique/Efient**, nala soo xiriirtid hawl-galka kahor.
- Haddii aad isticmaashid **Xarelto/Eliquis/Pradaxa**, jooji 2 maalmood hawl-galka kahor.
- Haddii aad isticmaashid **Marevan**, waa inaad joojisid 3 maalmood kahor hawl-galka iyadoo xinjiroobistana (INR) lagu koontaroolayo shaybaarkayaga. Sidaa awgeed waa inaad timaaddaa ugu yaraan 1 saac kahor baarista adigoo ka sheegaya farriintan daaqadda qaabiliaadda ee Rugta caafimaadka bukaan-socodka (medisinsk poliklinikk).

- Haddii **qallin lagugu geliyey waal-wadneed (hjerteklaff)**, waa inaad lasoo xiriirtid rugta caafimaadka si loo diyaariyo in lagaa beddolo Marevan oo laguugu beddolo Fragmin baarista kahor.

## **Baarista laftigeeda**

Baaristu waxay socotaa 15 ilaa 30 daqiqadood. Wuxuu dhakhtarka ku helayaa jawaabta 4-6 toddobaad kadib.

## **Baarista kadib**

1-2 toddobaad gudahood ayaa dhakhtarkii kuusoo diray baarista loogu sheegi doonaa natijada baarista. Haddii nudayaal (cad yar oo jirro baaris ah) lagaa qaaday wuxuu dhakhtarka kusoo diray ku helayaa jawaabta 4-6 toddobaad kadib.

## **Dhibaatooyin?**

Aad bay u yar tahay in dhibi ka timaaddo baaristan walamadka iyo mindhicirka (rekto-/sigmoideoskopi). Marka lasoo goynayo nudayaalka ama la jarayo nabar waxaa dhaawac yari ku samaysmaa xuubka. Aad bay u yartahay inuu dhiig-furan yimaado, laakiin wuu imaan karaa ilaa 3-4 maalmood baarista kadib. Inta badan asaga ayaa iska joogsada.

Haddii uu jiro shaki ah in mindhicirku dhaawacmay, waxaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka heeganka waaxda caafimaadka guud ee isbitaalkaan, telefoon 23 22 50 00.

Dhakhtarka isbitaalku ma qorayo warqadda jirrada ee maalinta lagu baaray, laakiin waxaa lagu siin karaa caddayn ah inaad halkaan u timid baaris caafimaad.